SU'AALO IYO JAWAABO XAGA
Cudurka "Methicillin-resistant *Stephylococcus aureus (*MRSA)

Waa maxay MRSA?
MRSA waa nooc bakteeriya ah oo iska caabiya noocyo ka mid ah antibiyootika. Si aad u fahamto MRSA-da waxa wanaagsan inaad wax ka barato bakteeriyada *Stephylococcus aureus*, ee badanaaba loo yaqaan "staph", waayo MRSA-du waa nooc ah staph.

Waa maxay staph-ku?
Staph-ku waa nooc bakteeriya ah oo caadiyan uu sido jidhka ama sanka dad caafimaad qabaa. Ilaa 25-30% dadka ku nool Maraykanka waxa jidhkoodu waqti uun sidi karaa staph-ka.

Staph-ku mar walba dadka ma cudur buu qaadsiiyaa?
Maya. Dad badan baa staph-ka ku sidi kara sankooda ama jidhkooda ilaa muddo iyagoo aan ogayn inay sidaan. Mana qaadaan cudurada maqaarka. Kamana muuqdaan calaamadaha ama sansaanada cudurku. Tan waxa la dhahaa "degelsimo" (colonization).

Mararka qaarkood, laakin, staph-ku wuxu dhaliyaa cudur, siiba finan, furuuruc, dhibaatooyin kale xaga maqaarka. Cuduradani inta badan waxay keenaan malax, waxayna leeyihiin cuncun iyo diiranaan. Mararka qaarkood, staph-ku wuxu sababaa cuduro sii xun.

Sidee baa staph-ku u fidaa?
Staph-ku wuxu ka fidaa iyadoo si toos ah laba qof maqaakoodu istaabtaan, sida gacmaha laysku salaamo, legdinta, ama siyaabaha kale ee jidhka qof si toos ah u taabto jidhka qof kale. Staph-ka waxa kalee fidiya taabashada alaab dadka staph-ka qabaa taabteen, sida tiwaalada la wadaago ee laysku tirtiro, qalabka cayaaraha ee la wadaago ee jimka ama gegida cayaaraha.

Cudurada staph-ku waxay ka bilaabmaan marka bakteeriyadu gasho nabar jidhka ku yaal, sida sarmo, xagtin ama maqaarka oo dilaacay. Dadka qaba cudurada maqaarka – xanuunka, findoob bararsan, furuuruc, cucun, matalanba – waa inay aad uga taxadaraan inay dad kale ku faafiyaan cudurkooda.

Cudurka MRSA miyuu ka duwan yahay staph-ka?
Haa. MRSA waa ka duwan yahay cudurada kale ee staph-ka waayo laguma daweyn karo antibiyootika. Marka loo baahdo antibiyootikada si loo daweeyo cudurka MRSA, waa in la isticmaalaa antibiyootikada ku haboon. Hadaan la isticmaalin antibiyootikada ku haboon, daweyntu ma shaqaynayso.

MRSA waxay si kastaba ugu dhawaan la mid tahay cudurada kale ee staph-ka:
- MRSA waxa xambaari kara maqaarka ama sanka dadyaw caafimaad qaba, sida caadiga ahna ma qaadaan lagamana qaado cudurka.
- Wuxu maqaarka u keeni karaa cuduro sahlan oo iska baaba'a iyadaan waxba lagu daweyn.
- Wuxu u faafaa siyaabaha cudurada staph-ka ee kale.
- Calaamadahiisu waxay la mid yihiin kuwa cudurada kalee staph-ka.

MRSA marmar waxa loo akhriyaa sida eray qudha, "mersa" ama afarta xaraf, "M-R-S-A"

Waa maxay calaamadaha uu keeno qaaditaanka staph-ku?

Findoobka, furuuruca, fiannka malaxaysa, siiba markay diiran yihiin, xanuun leeyihiin, guduutaan ama bararsan yihiin, waxa micnaheedu noqon karaa in aad qabto cudurka staph-ka ama MRSA.

Mararka qaarkood, staph-ku wuxu keeni karaa dhibaatooyin aad u xun sida cuduro nabar qaliin, cudurada dhiigaraaca iyo oofwareen. Calaamadaha waxa ku jiri kara xumad saraysa, barar,diirimaad iyo xanuun nabarka ku xeeran, madax xanuun, daal iyo waxyaabo kale.

Maxaan sameeyaa hadaan u maleeyo in jidhkaygu staph qabo?

Meesha bugta ku dadaal inaad nadiifiso oo qalajiso. Dhakhtarkaaga u tag, siiba hadii nabarku weyn yahay, xanuun badan yahay, diiran yahay markaad taabato, ama uu iskiis u bugsan waayo.

Sidee baa dhakhtarku u garanayaa hadaan qabo cudurka MRSA?

Sida keliya ee lagu garan karaa faraqa u dhexeeya MRSA iyo cudurada staph-ka ee kale waa in shaybaar lagu sameeyo. Tijaabooyinka shaybaarka waxay kalee dhakhtarka ku caawinayaan nooca antibiyootikada uu daaweyn u isticmaalayo, hadii antibiyootiko lagama maarmaan noqoto.

Dhakhtaarkaagu caadiyan wuxu sambal kaga qaadayaa suuf qori ku xiran (sida “Q-tip”-ka) meesha bugta. Sambalka waxa loo dirayaa shaybaarka si loo ogaado inuu cudurku ka dhashay staph-ka. Dhiiga iyo dareereyaalka kalena waa laga fiirin karaa cudurka.

Sidee loo daweeyaa cudurada MRSA?

Cudurada MRSA ee jidhka inta badan waxa lagu daweeyaa daryeel wacan oo nabarka iyo maqaarka la siiyo: meesha oo laga dhigo nadiif oo la qalajiyo, gacmahaaga oo aad mayrto markaad meesha daryeesho, adoo meel haboon ku tuuraya baandheysyada, jirkaagana u ogolaada inuu iskiis bogsado.

Mararka qaarkood dawayntu waxay u baahan tahay isticmaalka antitiyootikada. Tijaabinta shaybaarka baa dhakhtarkaaga ku caawinaya nooca antibiyootikada daweynta loo isticmaalayo, hadii antibiyooyikadu lagama maarmaan tahay. Hadii laguu soo qoro antibiyootiko, waxa muhim ah in loo isticmaalo sida lagu faray hadaan dhakhtarkaagu ku farin inaad joojiso. Hadiicudurku ku raysan waayo dhawr maalmood kadib markaad dhakhtarkaaga aragto, mar labaad dhakhtarkaaga ku noqo.

Sidee baan isaga celin karaa staph-ka?

- Gacmaha oo aad joogto u maydho waa sida ugu wacan ee laysaga celiyo qaadida iyo faafinta staph-ka, iyo oo kale MRSA. Gacmahaaga had iyo goor nadiifi adoo si joogto ah saabuun iyo biyo diiran ku maydhaya ama isticmaalaya dareereyaalka alkoladu ku jirto ee jeermiska lagu dilo, siiba markaad qof kale si toos ah jidhkiisa u taabato.
- Meelaha ku sarma ama xagtimaha nadiifi oo baandheys ku xir ilaa ay bogsadaan.
- Iska ilaali taabshada dadka kale nabaradooda ama baandheysyada.
- Ka fogow inaad dadka la wadaagto waxyaabaha shakhsiyeed sida tiwaalada, maryaha wax lagu dhaqo, cadayada iyo makiinadaha. Wadaaga alaabtani waxa qof ilaa qof uga gudbi kara staph-ka.
- Jidhkaagu had iyo goor nadiif ha ahaado, iskana ilaali in maqaarku ku qalalo, oo qolfo yeesho, siiba waqtiga qaboobaha. Jidhka nadiifta ahi wuxu kaa caawiyaa in staph-ka korkaaga saarani uusan sababin cudur ku dhasha hoosta maqaarkaaga.
- La xiriir dhakhtarkaaga hadii maqaarku ku bukoodo oo uu bugsan waayo.

Wixi warar dheeraad ah xaga MRSA
Booqo “website”-ka WCDM ee www.mass.gov/dph